

Garaac Taleefanka: Markaad aadeyso guryaha dadka, iska hubso inaad haysato macluumaadka soo socda:

- Aqoonsigaaga Santrax ID.
- Aqoonsiga Qofka loo adeegayo.
- Lixda lambar ee ugu horreeya xaqiijinta booqashada oo u taagan taariikhda iyo wakhtiga imaanshaha (sida la ogaaday bilowga booqashada).
- Lixda lambar ee labaad ee xaqiijinta booqashada oo u taagan taariikhda iyo wakhtiga tegidda (ee lagu siiyey dhammaadka booqashada).

Marka aad haysato macluumaadkaas, waxaad soo garaaci kartaa lambarka Santrax!

Markaad Timaaddo:


Markaad timaaddo guriga qofka loo adeegayo, taabo oo sii daa batoonnada Qalabka FVV oo qoro lixda lambar ee Ugu horreeya xaqiijinta booqashada oo kuugu qoran shaashadda, lambarkaas waad isticmaali doontaa si aad u soo garaacdo lambarka Santrax. Qoro taariikhda iyo wakhtiga aad riixday batoonka.

Bixidda Ka-hor:

Dhammaadka booqashada, taabo oo sii daa batoonnada Qalabka FVV oo qoro lixda lambar ee Labaad xaqiijinta booqashada oo kuugu qoran shaashadda, lambarkaas waad isticmaali doontaa si aad u soo garaacdo lambarka Santrax. Qoro taariikhda iyo wakhtiga aad taabato batoonka.














OGOW: Haddii aad u baahan tahay inaad lamabarkan hadda aragto, taabo oo sii daa batoonka hal mar oo kale si aad u aragto waxaad akhrineyso. Haddii aad hesho lambar kale, waa okeey, isticmaal lambarka cusub.














- Ha soo garaacin taleefanka Santrax ugu yaraan 15 daqiiqadood ka dib waxaad heleysaa lixda lambar ee labaad dhammaadka booqashadaada.
- Waxaa inaad soo garaacdo taleefanka Santrax toddoba daqiiqadood gudahood bilowga booqashada.
- Uma baahnid inaad sugto taleefanka ilaa iyo goobta qofka loo adeegayo.
- Lixda lambar ee xaqiijinta booqashada waxaa la gelinayaa hal mar oo la soo garaaco taleefanka Santrax.

1.  **Garaac taleefan ka mid ah kuwa lacag la'aanta ah ee lagaa siiyey xafiiska.** Haddii aad dhib kala kulanto lambarka taleefanka ugu horreya, fadlan garaac lambarka labaad oo ah nooca lacag la'aanta.



Habka Santrax waxaad ka maqleysaa: **Af Ingiriis, fadlan taabo lambar (1). Af-carabiga Masar, fadlan taabo lambar labo (2). Afka Barmiiska, fadlan taabo lambar saddex (3). Afka Shiineyska, fadlan taabo lambar afar (4). Afka Faransiiska, fadlan taabo lambar shan (5). Afka Hindiga, fadlan taabo lambar lix (6), Afka Moong, fadlan taabo lambar toddoba (7), Afka Laawooshiyanka, fadlan taabo lambar siddeed (8), Afka Nabaal, fadlan taabo lambar sagaal (9), Afka Ruushka, fadlan taabo lambar toban (10), Afka Seerbiya, fadlan taabo lambar kow-iyto-toban (11), Afka Soomaliga, fadlan taabo lambar laba-iyto-toban (12), Afka Isbaanishka, fadlan taabo lambar saddex-iyto-toban (13), Afka Sawaaxiliga, fadlan taabo lambar afar-iyto-toban (14), Afka Fiyatnaam, fadlan taabo lambar shan-iyto-toban (15).”** Taleefanka jawaabtiisa ayaa laga maqlaa luuqadaha la kala dooran karo.

2.  **Taabo lambarka luuqadda aad rabto in aad isticmaasho.**
Farriimaha kale oo dhan waxay ku baxayaan luuqadda lagu codsado.
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Soo-dhawoow, fadlan geli lambarkaaga Santrax ID.”**
3.  **Taabo lambarradaada aqoonsiga Santrax oo isticmaal lambarrada taleefanka.**
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Booqashadaadu ma guri kooxeed baa? Taabo (1) oo ah Haa ama (2) oo ah Maya.”**
4.  **Taabo (2) haddii ayasn booqashadu ahayn dad badan.**
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Haddii ay arrintan tahay Fixed Visit Verification (Caddeynta Booqashada Go’an) oo aad isticmaaleyso qalabka FVV, taabo calaamadda xiddigta (*) si aad u geliso lambarrada xaqiijinta booqashada. Haddii kale, taabo calaamadda afar-geeska ah (#) si aad uga socoto.”**
5.  **Taabo calaamadda xiddigta (*) si aad ugu celiso.”**
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Fadlan geli ugu horreyn Lambarka Qofka loo adeegayo.”**
6.  **Geli Lambarka Qofka loo adeegayo.**
Haddii la khaldo Lambarka Qofka loo adeegayo, Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Kama diiwaan gashna FVV, fadlan ku celi Lambarka qofka loo adeegayo ama taabo calaamadda afar-geeska ah (#) si aad u sii wadato.”**
-  Marka aad si sax ah u geliso Lambarka Qofka loo adeegayo, Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Fadlan geli ugu horreyn lambarka xaqiijinta booqashada ama taabo calaamadda afar-geeska ah (#) si aad uga socoto.”**
7.  **Geli lambarka ugu horreeya xaqiijinta booqashada.**
Waa lambarka ugu horreeya ee ugu horreyn lagugu siiyey qalabka FVV markii aad timaadday guriga qofka loo adeegayo oo aad caddeyneyso wakhtigaaga imaanshaha.
-  Marka si sax ah loo geliyo lambarka xaqiijinta booqashada, Santrax waxaad ka maqleysaa xaqiijin ah: **“Lambarkii ugu horreeyey ee xaqiijinta booqashada waa (TAARIKHDA/WAKHTIGA). Haddii uu khaldan yahay, taabo lambar 1 si aad ugu celiso ama taabo calaamadda afar-geeska ah (#) si aad uga socoto.”**
- OGOW:** Dhageyso si aad u hubiso taariikhda iyo wakhtiga lagu siiyey in ay isku mid yihiin sida ku qoran qalabka dhinaciisa hoose. Haddii ay kala duwan yihiin, lambar khaldan oo ah xaqiijinta booqashada ayaad gelisay. Taabo lambar 1 si aad mar labaad u qorto lambarka.
8.  **Taabo calaamadda afar-geeska ah (#) si aad uga socoto.”**
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Fadlan geli lambarka labaad ee xaqiijinta booqashada ama taabo calaamadda afar-geeska ah (#) si aad uga socoto.”**

9.  **Geli lambarka labaad xaqiijinta booqashada.**
Kaasi lambarka lixda lambar ee labaad ee aad ka heshay qalabka FVV dhammaadka booqashada. Wuxuu kuu ahaan doonaa wakhtigaaga bixidda.
-  Marka la geliyo lambarka xaqiijinta booqashada, Santrax waxaad ka maqleysaa xaqiijin ah: **“Lambarkii labaad ee xaqiijinta booqashada waa (TAARIIKHDA/WAKHTIGA). Haddii uu khaldan yahay, taabo lambar 1 si aad ugu celiso ama taabo calmaadda afar-geeska ah (#) si aad uga socoto.”**
10.  **Taabo calaamadda afar-geeska ah (#) si aad uga socoto.”**
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Fadlan geli Lambarka Qofka loo adeegayo.”**
11.  **Taabo lambarka adeegga ama Service ID aad sameysay.**
U tixraac liiska adeegga xafiiska.
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Waxaad bilowday (ADEEGID). Fadlan taabo (1) si aad u aqbasho, (2) si aad uga noqoto.”**
12.  **Taabo lambarka kow (1) si aad u aqbasho, ama taabo lambar labo (2) si aad uga noqoto.**
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Qor tirada hawlaha.”**
13.  **Taabo tirada lambarrada hawlaha loo qabtay qofka loo adeegayo.**
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **“Qor aqoonsiga hawsha.”**
14.  **Taabo Lambarka Adeegga aad qabatay.**
QORAALLO GAAR AH:
- U tixraac liiska hawsha xafiiska.
 - Haddii aad qabatay hal hawl ka badan, sug si aad u xaqiijiso qorista hawsha koowaad, dabadeedna qor lambarka hawsha ku xigta ilaa aad qorto hawlaha aad qabatay ee booqashada oo dhan.
 - Haddii aad qabaneysa hawl aad akhrineysa, barnaamijka Santrax wuu joogsan doonaa ka dib markaad geliso lambarka Task ID. Marka uu barnaamijku ku sugayo, taabo waxa akhriska ah ee hawsha adigoo isticmaalaya lambarrada ku qoran liiska hawsha.
 - Haddii aad khalad sameysa markaad qoreysa Hawlaha, taabo “00”, si barnaamijku kuugu xaqiijiyo oo waxaad maqleysaa: **“Mar Kale Bilow, Qor tirada hawlaha”**. Mar labaad qor lambarka hawsha.
-  Santrax waxaad ka maqleysaa: **(FAAHFAAHINTA HAWSHA) Waxaad gelisay (TIRADA) hawl(aha). Mahadsanid, nabadgelyo”**
15.  **Daminta taleefanka.**



Sandata
TECHNOLOGIES

Hoggaanka Tixraaca Taleefanka:

«COMPANY_NAME»

Lambarka Koontada Xafiiska: STX«ACCOUNT»

Kor ku qor lambarkaaga Santrax ID tixraac ahaan.

Garaac:

1-«Primary_Phone»

Ama

1-«Secondary_Phone»

Waxyaabo dheeraad ah:

Taabo Luuqaddaad Rabto
Booqasho Koox Ahaaneed -
Maya
Adeeg

Bilowga Soo-gelidda/Sii-bixidda
Fixed Visit Verification (Caddeynta
Booqashada Go'an) - Maya
Hawl